Washington State Department of
HEALTH



# Dhimashada Hooyada Dhallaanka EE 2014-2020

## Gobolka Washington Guddiga Dib u Eegista Dhimashada Hooyada Dhalaanka

Washington State Legislature (Sharci-dejinta Gobolka Washington) ayaa 2016 Department of Health (Waaxda caafimaadka) ka sameeysay Maternal Mortality Review Panel (Guddiga Dib-u-eegista Dhimashada Hooyada Dhalaanka).Guddigu waxay dib u eegaan dhimashada hooyada dhallaanka ee gobolka waxayna soo saaraan natiijooyin iyo talooyin si mustaqbalka looga hortago dhimashada hooyada dhalaanka.

Hadafyada dib u eegista waxaa ka mid ah go'aaminta in dhimashadu ay la xiriirto uurka, in laga hortagi karay, arrimaha ka sababay dhimashada, iyo fursadaha wax looga qaban karay.

Marka la baaro dhimashada hooyada dhalaanka, nidaamka caafimaadku wuxuu noqon karaa mid wax ku ool ah oo wax ka qabta arrimaha keena dhimashadan.

MMRP waxa ay ka kooban tahay ku dhawaad 70 xirfadlayaasha caafimaadka dhalmada iyo adeegga kuwaas oo ka kala yimid meelo kala duwan oo ku nool kana shaqeeya gobolka oo dhan Xubnaha guddiga waxaa magacaaba Secretary of Health (Xoghayaha Caafimaadka) waxayna guddiga shaqeeyaan hal ama wax ka badan saddex sano ah. Xubnaha guddigu waa inay si adag ugu hoggaansamaan xeerarka asturnaanta oo aanay gelin wax macluumaad ah oo la aqoonsan karo. Xubnaha guddiga wax lacag ah laguma siiyo ka qaybqaadashadooda. .

Tani waa xog kooban oo ku saabsan natiijooyinka heerka sare iyo xogta lagu soo bandhigay warbixinta sharci-dejinta ee 2019.

Maarso 2023

**224**

### Dhimashada uurka la xiriirta

Dhimashada qofka inta uu uurka leeyahay ama sanad gudaheed wakhtiga uurka, sabab kasta ha ahaatee.

**97**

### Dhimashada uurka la xiriirta

Dhimashada qofka inta lagu jiro uurka ama sanad gudaheed wakhtiga uurka oo sababay dhibaato dhanka uurka ah, dhacdooyin taxane ah oo uurku sababay, ama ka sii daraysa xaalad aan xidhiidh la lahayn saamaynta jir ahaaneed ee uurka.

**80%**

**ee dhimashada uurka la xiriirta ayaa laga hortagi karay**

# Natiijooyinka kooban ee ka soo baxay dib u eegista dhimashada hooyada dhalaanka ee 2014-2020

**Heerarka dhimashada hooyada ee Washington waa mid deggan.** Xogta taariikhiga ah ee laga soo ururiyay dhimashada hooyada dhalaanka ee dhacday intii u dhaxaysay 2000 iyo 2020 waxay muujinaysaa in heerka dhimashada hooyada ee Washington ay kala duwanaatay wakhti ka dib, laakiin waa ay deggan tahay mana u kordheyso sida heerka qaran.

2014-2020, waxaa jiray:

**224 dhimasho oo uurka la xiriirta,** kuwaas oo ah dhimasho dhacay xilliga uurka ama sanadka ugu horeeya ee uurka sabab kasta ha noqotee.

Tan waxaa ku jira dhammaan noocyada dhimashada, oo ay ku jiraan dhibaatooyinka dhalmada, shilalka baabuurta, kansarka, iyo dilka.

**97 dhimasho oo uurka la xiriirta,** kuwaas oo ah dhimasho ay guddiga dib u eegista dhimashada hooyada dhalaanka ee gobolka ay go'aansadeen in ay si toos ah u sababtay ama lala xiriiriyay dhibaatooyinka uurka, dhacdooyin taxane ah oo uurku sababay, ama xaalad aan xidhiidh la lahayn oo uurka sii huriyay.

## Sababaha ugu horreeya ee dhimashada uurka la xiriira waxay ahaayeen xaaladaha caafimaadka maskaxda iyo dabeecadda.

Sababaha ugu horreeya 97 dhimashada oo uurka la xiriira ayaa ah xaaladaha caafimaadka dabeecadda (32 boqolkiiba), oo ay u badan tahay **is-dilid** iyo **isticmaalka daroogo xad dhaaf ah**. Sababaha kale ee caadiga ah waxaa ka mid ah **dhiig-baxa** (12 boqolkiiba) iyo **caabuqa** (9 boqolkiiba).

Kani waxaa kujira dhimashooyinka ka dhasha khalkhalka Caafimaadka dhimirka iyo maskaxda ee sababay isdilka iyo cunista kuurooyinka daroogada ee dheeraadka ah.

Washington State Department of HEALTH

DOH 141-081 March 2023 Somali

Dadka naafada ah, dukumeentigan waxay ku heli karaan qaabab kale. Fadlan wac 800-525-0127 (TTY 711) ama iimayl u dir civil.rights@doh.wa.gov

## Boqolkiiba 69 dhimashada uurka la xiriirta waxay dhacday xilliga uurka ama lixda toddobaad ee ugu horreeya uurka ka dib.




## Arrimaha ugu horreeya ee sababay dhimashada laga hortagi karo waxaa ka mid ah tayada daryeelka, helitaanka daryeelka caafimaadka iyo adeegyada taageerada, baaritaan habboon iyo dabagal, iyo takoorid.

Maternal Mortality Review Panel ayaa aqoonsaday qodobbada sababay dhimashada uurka la xiriirta, oo ay ku jiraan:

- Cilmi yarida xirfadaha bukaan-socodka iyo tayada daryeelka
- Eexda iyo takoorka
- Baadhitaan la'aan, dabagal la'aan dhanka arrimaha khatarta ah, isku-duwid la'aan ee daryeelka ama sii wadid la'aanta daryeelka, ama helid la'aanta daryeelka caafimaadka iyo daaweynta caafimaadka dabeecadda.

Sababaha waxaa sii xumeeyay go'aamiyaasha bulshada iyo qaab dhismeedka caafimaadka sida guri la'aanta iyo cunsuriyadda nidaamka.

**Baro wax badan oo ku saabsan dhimashada hooyada dhalaanka ee gobolka Washington iyo waxa la qabanayo si loo horumariyo daryeelka iyo taageerada dhalmada. Booqo doh.wa.gov/maternalmortality.**

**Iskuduwaha Dib u eegista Dhimashada Hooyada Dhalaanka**
Prevention and Community Health (Kahortagga iyo Caafimaadka Bulshada)
Washington State Department of Health (Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington)
maternalmortalityreview@doh.wa.gov
360-236-3510